



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/450/2021

TR. 09/08/2021

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, HESHIIS QAYBSI IYO WAKAALAD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 09/08/2021, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1- **C/risaaq Salaad Suudi**, Somali ah, Ku Dhashay Caabud-waaq Sanadkii 1967, Ina Geelo Carab Gabayre, oo sita National Id.No.26704015738395.

2- **Yuusuf Macalin Faarax**, Somali ah, Ku Dhashay Garbahaarey Sanadkii 1952, Ina Xaliimo Sh.Muxumed Cabdile, Sita W.A.L.060/Wasaarada Arimaha Gudaha & Federalka.

3- **Burhaan Xuseen Buraale**, Somali ah, Ku Dhashay Garbahaarey Sanadkii 1974, Ina Cabdiyo Gaas Maxamuud oo sita W.A.L.196/D/hoose ee Muqdisho.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in ay geeriyootay Marxuumad la oran jiray **MARXUUMAD COWRALO MAXAMUUD YUUSUF**, Kuna Geeriyootay Nairobi 2003, labadeedii waalid wey ka geeri horeeyeen, Nina Ma uusan Qabin, Awlaadna Ma aysan Dhalin, ifkane waxay uga tagtay oo Dhaxlaya Casabo, Taasoo ah, Labo Wiil loo ay Eedo u tahay Waxayna Kala Yihiin

DADKA:-

1- Maxamed Cilmi Maxamuud Degan Xamar Dhashay 1930 (Casabo)
2- Shire Suudi Maxamuud Marxuum (Casabo)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyooday **Marxuum Shire Suudi Maxamuud**, Kuna Geeriyooday Nairobi Sanadkii 2006, Aabihiis iyo Hooyadiis way ka Geeri Horeeyeen Wuxuuna Ifka uga Tagay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban 1, Xaas, 8, Wiil, iyo 5, Gabdhood, Waxayna Kala Yihiin :-

B-)BAH:- KAMAC AXMED CALI "Marxuumka Ma uusan qabin"

1-Sharmarke	Shire	Suudi	Degan Kenya	Dhashay 1962	(Wiilkii Marxuumka)
2-Deeqo	Shire	Suudi	Degan italy	Dhalatay 1963	(Gabadhii Marxuumka)
3-Cawil	Shire	Suudi	Degan Uk	Dhashay 1967	(Wiilkii Marxuumka)
4-Jamiilo	Shire	Suudi	Degan Uk	Dhalatay 1970	(Gabadhii Marxuumka)
5-Raage	Shire	Suudi	Degan Canada	Dhashay 1970	(Wiilkii Marxuumka)
6-Ubax	Shire	Suudi	Degan Usa	Dhalatay 1973	(Gabadhii Marxuumka)
7-Ayaan	Shire	Suudi	Degan Canada	Dhalatay 1976	(Gabadhii Marxuumka)
8-Guuleed	Shire	Suudi	Degan Austalia	Dhashay 1979	(Wiilkii Marxuumka)
9-Warfaa	Shire	Suudi	Degan Usa	Dhashay 1982	(Wiilkii Marxuumka)

T-)BAH:- KHADIJO MAXAMUUD "Marxuumka Ma uusan qabin"

1-Maxamuud	Shire	Suudi	Degan Chaina	Dhashay 1992	(Wiilkii Marxuumka)
2-Saalax	Shire	Suudi	Degan Usa	Dhashay 1993	(Wiilkii Marxuumka)
3-Sahal	Shire	Suudi	Degan Usa	Dhashay 1993	(Wiilkii Marxuumka)



=MASAWIRADA MARKHAATIYAASHA=

Cabdirisaaq Saalad Suudi

Yuusuf macalin faarax



Burhaan Xuseen Buraale




=MASAWIRKA QOF KA MID AH DHAXALKA=

=MASAWIRKA WAK/ DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA

Maxamad cilmi maxamuud

Ayaan shire suudi



J-)BAH:- MARYAN AXMED MAXAMED “Marxuumka Ma uusan qabin”

1-Luuley Shire Suudi Degan Afgooye Dhalatay 1991 (Gabadhii Marxuumka)

X-)BAH:- BARQO CABDI ABUUKAR “Marxuumka Wuu qabay Oolaadna Ma aysan u dhalin”

1- Barqo Cabdi Abuukar Degan Kenya Dhalatay 1964 (Xaaskii Marxuumka)

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumada dhaxleysa oo Nool ama geeriyootay haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMADA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUMAD COWRALO MAXAMUUD YUUSUF** ay ifka uga tagtay Labo Guri Dhisan oo ku yaal xamar 1- Degmada (**Boondheere**) Lehna **W.M.L.DH/MG/GGDM/01/15/2016 Tr.20/10/2016** Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Xamar, Cabirkiisuna dhan yahay (**12X12-M=144**)-MQ.

2- Guri Dhisan oo ku yaal xamar Degmada (**Boondheere**) Lehna **W.M.L.DH/MG/GGDM/01/15/2016 Tr.20/10/2016** Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Xamar, Cabirkiisuna dhan yahay (**18.30X13.8**)-M.

WAKAALAD

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhamaan dhaxaltooyada ay Soo Wakiisheen **Ayaan Shire Suudi**, Sida Ku Cad **Wakaalad Guud Ref NO. W459/06/21 Tr.20/06/2021** Kana Soo Baxday Safaarada Somaliya ay Ku Leedahay Melbourne-Austalia Waxaana Wakaaladaan Soo Wada Xaqiijiyey Wasaarada Arimaha Dibadda ee D.F.Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka ee Gobolka Banaadir, Una soo wakiisheen dhamaantood in ay u maamuli karto, dhaxalkoob u samayn karto, gadi karto, Wareejin Karto, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karto, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karto qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUMAD COWRALO MAXAMUUD YUUSUF & MARXUUM SHIRE SUUDI MAXAMUUD.**

HESHIIS QEYBSI BOOSAS.

Sidoo Kale maragta Sare Ku Xusan Waxay Maxkamadda Horteeda Ka Cadeeyeen Dhaxaltooyada Marxuumad Cawrala Maxamuud Yuusuf iyo Faraceeda in ay Qaybsadeen Labada Guri ee Sare Ku Xusan iyagoo Heshiis ah Raalina ah, una Qaybsadeen Sidatan: **A- MAXAMED CILMI MAXAMUUD** Wuxuu Helay Guri Ku Yaal Xamar Degmada (**Boondheere**) Lehna **W.M.L.DH/MG/GGDM/01/15/2016 Tr.20/10/2016** Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Xamar, Cabirkiisuna dhan yahay (**12X12-M=144**)-MQ Soodimhiisuna ay Yihiin Koofur iyo Galbeed Waxaa Ka mara Jidad inta Kalana Waxaa Ka Xiga Guryo dad, Sidoo Kale, **B- Dhamaan Dhaxaltooyada Marxuum Shire Suudi Maxamuud Waxay Heleen** Guri Dhisan oo ku yaal xamar Degmada (**Boondheere**) Lehna **W.M.L.DH/MG/GGDM/01/15/2016 Tr.20/10/2016** Kana Soo Wada Baxay D/hoose ee Xamar, Cabirkiisuna dhan yahay (**18.30X13.8**)-M



=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- C/risaaq Salaad Suudi

2-) Yuusuf Macalin Faarax

3-Burhaan Xuseen Buraale




=SAXIIXA QOF KA MID AH DHAXALKA=

Maxamed Cilmi Maxamuud

=SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA=

Ayaan Shire Suudi



SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay Aragtay Dukumintiga Guryaha ee ay Marxuumada ku qoran tahay, Markay Aragtay Wakaalada sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugaysaa geerida Marxuumiinta Kala ah MARXUUMAD COWRALO MAXAMUUD YUUSUF & MARXUUM SHIRE SUUDI MAXAMUUD, oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugaysaa in Ayaan Shire Suudi, oo Dhaxaltooyada Ka Tirsan ay Wakiil buuxa u tahay dhamaan dhaxaltooyada isla markaana ay awood buuxda u leedahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen MARXUUMAD COWRALO MAXAMUUD YUUSUF & MARXUUM SHIRE SUUDI MAXAMUUD, ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob, Cadeyn Tariko, Heshiis Qaybsi iyo Wakaalad ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

Dr. Axmed Maxamed Cali



DOWLADDA HOOSE
EE MUQDISHO




MUNICIPALITY
OF MOGADISHU

KAARKA AQQONSIGA

Lambar:

196



Magaca..... BURHAAN
Aabaha..... XUSEEN
Awowga..... BURAALE
Naynaas..... BURHAAN
Goobta
Dhalashada: GARBAHAREY
Sanadka..... 02-Jan-1974
Jinsiyada..... SOOMAALI

Shaqada..... ganacsade

Astaan Gaar: MALAHA

Hooyada:

CABDIYO GAAS MAXAMUD



Duqa Magaalada:



Aqoonsigan waxaa ogolaatay Dowladda Hoose ee Muqdisho. Qaarki hore
aqqomigaan, fadlan guddoonsii xafisyada Dowladda Hoose ee Muqdisho
kan kuugu dhow.

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
26704015738395



Magaca/الاسم/Name

ABDIRIZAK
SALAD SUDI



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth
01 Apr 1967 ABUDWAK

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue
27 Jul 2021 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry
26 Jul 2026

Lab/Dheddig/الجنس/Gender
MALE

Mudane: Yusuf Macalin
Mr: Fayax

Jagada: Nabadoon
Position

Hooyo: Xalimo Sh. M.
Mother

Kudhashay: Salimsoor
Place of Birth

Dhashay: 12/01/7
Date of Birth

SAXIIXA QOFKA/ SIGNATURE
[Signature]



12/01/7

1028

Saxiixa Qofka/ Signature

[Signature]

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
26704015738395



Magaca/الاسم/Name

ABDIRIZAK

SALAD SUDI



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth
01 Apr 1967 ABUDWAK

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue
27 Jul 2021 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry
26 Jul 2026

Lab/Dheddig/الجنس/Gender
MALE



Wasaaradda Arimaha
Cudaha & Iedeyaalka

Odayaashii Dhaqanka
Warqadda Arqoonsiga

№ 060

